

Sharciga 30 Setembar 1956 lamba. 7.

Amarka “Wadajirka Soomaalida”

MAAMULAHAA

Marka uu arkay oggolaashaha Golaha Xeer Dejinta;

WUXUU SAARAYAA OO ANSINAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Waxaa la dhisay “Nidaamka Wadajirka Soomaalida oo loogu talagalay in lagu caddeeyo muwaadiniinta soomaalida oo qaddarin gaara Dalka ka mutaystay. Maamuusidda Nidaamkaan waxaa la siin karaa xitaa shisheeyaha.

Qod. 2

Madaxa Nidaamkaan waa Maamulaha.
Nidaamka waxaa hagaya Gole uu magaacaabo Maamulaha oo ka kooban Kaaliyaha Nidaamka iyo Wasiirkha Arrimaha Gudaha.

Qod. 3

Nidaamku wuxuu ka koobanyahay affar dabaqadood:

- Xidigtu dabaqadda koowaad;
- Xiddigta dabaqadda labaad;
- Xiddigta dabaqadda saddeexaad;
- Xiddigta dabaqadda affaraad.

Tirada ugu badan ee maamuusidda e la bixiin karo sanad kasta waxaa dekereeto ku soo saaraya Maamulaha.

Qod. 4

Maamuusidda waxaa lagu bixinayaan dekereeto uu soo saaro Maamulaha, kadib marka uu dhagaysto Golaha Nidaamka.

Qod. 5

Maamuuska waxaa la siinayaan kuwa mutaystay qaab qaddarin leh inta lagu guda jiro ciidaha qaranka.

Qod. 6

Maamuusidda waxa lagu weyn kara marka lala yimaado meel ka-dhac. Kala noqoshadana waxaa ku dekereeto ku dhawaaqaya Maamulaha marka la helo tala soo jeedinta sababaysan ee Golaha Nidaamka, iyo sikastaba haddii la helo xukun ciqaaba oo dhaqan galay.

Qod. 7

Waxaa ka reeban hay'adaha, ururada iyo shaqsiyaadka gaarka in ay bixiyaan qaab kasta maamuusidda, billadaynta iyo qaddarinada. Kuwa ku xadgudba waxaa lagu ciqaabayaa lix bilood illaa laba sano oo xarig ah iyo ganaax ah illaa kun Sh.Som.

Qof kasta qaab kasta iyo nooc kastaku adeegsada, maamuusidda, biilladaynta ama qaddarinada lagu soo sheegay faqradda sare, waxaa lagu ciqaabayaa illa ganaax ah affar boqol oo Sh. Som.

Qod. 8

Maamulaha waxaa loo fasaxay in uu soo saaro sharci lagu meelmarinayo xeerkaan.

Xeerkaan waxaa lagu biirinaya Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka waxaana lagu faafinaya Faafinta Rasmiga. Cid kastaana wuxuu ku waajibinaya in ay ilaalso una hogggaansanaato xeer Soomaali ahaan.

Taariikhad, Muqdisho, 30 Setembar 1956.

ANZILOTTI

Xaaji Muuse Boqor

Cabdullaahi Ciise Maxamuud